

# Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga Qoysaska Ardayda Darajooyinka K-6



## Dastuurka Utah wuxuu mamnuuca kharashka khidmadaha dugsiyada hoose.

Haddii uu ku jiro xanaanada ilaa darajada lexaad, laguma soo dallici karo buugaagta, qalabka fasalka ama saadka, qalabka muusikada, safarada dibadda, isu imaashada, cuntada fudud (waxyaabaha kale aan raashinka ahayn ee laga bixiyo Brograamka Qadada Dugsiga), ama waxyaabaha kale ee ka dhaca ama la adeegsado maalin dugsiyeedka caadiga.

**Khidmadaha waxaa lagu soo dallici karaa oo keliya** brograamyada la bixiyo dugsiga ka hor ama kaddib, ama waqtiyada la qaato fasaxa dugsiga. Waxaa dhici karto in khidmad lagu soo dallaco ardayga ku jira darajada lexaad iyo taga dugsiga ay wax ka bartaan hal ama ka badan darajooyinka 7-12, haddii dugsiga raaco modelka dugsiga sare iyo waxbarasho siiyo ardayga ku jira darajada lexaad dugsiga.

Sharciga Utah wuxuu rabaa in dugsiyada soo dallaca khidmadaha, in ay hubiyaan in arday kasta ay waalidiintiisa awoodi karin in ay bixiyaan khidmadda, in uu heli karo ka-dhaafidda khidmadda ama waxyaabo kale baddalkii la siin lahaa ka-dhaafidda khidmadda.

## Ka-Dhaafidda Khidmadda

Ka-dhaafidda khidmadda waa marka qofka laga dhaafo in uu bixiyo khidmadda. Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in la dhaafo dhamaan khidmadaha**. Haddii aan si gaar ah wax looga qabanin sharciga gobolka, dugsiga waa in uu ka dhaafo dhamaan khidmadaha, sida meel kasta uu ardayga ka qeybgeli karo ama iska dhaafi karo. Tan macnaheeda waxay tahay in ardayda xaq u yeesha ka-dhaafidda khidmadda in ay ka qeybgeli karaan fasal kasta dugsiga ama hawl kasta, iyadoo aan waxba lagu soo dallicin.

Ardayga wuxuu xaq u leeyahay ka-dhaafid haddii:

- qoyska ardayga qaato maal gelinta TANF [kuboonka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska (Family Employment Program) gobolka];
- ardayga qaato Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income);
- ardayga ku sugan yahay daryeelka korinta;
- ardayga ku jiro xabsiga gobolka; ama
- ardayga xaq u leeyahay taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (heerarka waxay qaabilsan yahiiin xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta).

*\*Ardayga wuxuu kaloo xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin heerarkaan balse weli uusan awoodin in uu bixiyo khidmadda. Fadlan tag dugsiga xaafadda ama fiiri siyaasadda dagmada si aad u heshid macluumaad badan.*

Haddii ardayga rabo in uu dalbado ka-dhaafidda khidmadda, waxaa la weydiin doonaa in uu keeno warqado ku saabsan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda, taasoo qeyb ka ah hawsha arjiga.

Si uu u dalbado ka-dhaafidda khidmadda, ardayga wuxuu soo gudbin karaa "Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda (Darajooyinka K-6)". Ogeysiiskan waxaa la soo raaciyay koobiga arjiga iyo koobiyo dheeraad ah waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga, ama bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka marka la gaaro dhamaadka warqadaan. Kaddib marka warqadaha loo gudbiyo dugsiga, waa la joojin doonaa shardiga bixinta khidmadda ilaa laga gaaro go'aan kama dambays ah oo ku saabsan xaq u yeelashada ardayga xagga ka-dhaafidda khidmadda.

Haddii la soo diido arjiga, dugsiga wuxuu soo diri doonaa "Foomka Go'aanka iyo Racfaanka" ("Decision and Appeal Form"). Foomka wuxuu sharaxi doonaa sababta loo diiday arjiga iyo sababta loogu baahan yahay in racfaan laga qaato. Xasuuso in aad mar kasta reebatid koobi. Haddii la soo gudbiyo diidmada ka-dhaafidda khidmadda, dhamaan khidmadaha uma baahna in la bixiyo ilaa go'aan laga gaaro racfaanka.

Haddii ardayga doono in uu dugsiga ka iibsado sawirada dugsiga, buugaagta sannadka, ama waxyaabo kale, kharashkaas ma aha khidmado, mana la dhaafi doono. Sidoo kale, haddii ardayga lumiyo ama khasaariyo hantida dugsiga, kharashka ku baxa baddalaadda ama hagaajinta ama aha khidmado mana loo baahna in laga dhaafo.

# Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga K-6 sii socda

---

## Deeqda, Qarsoodiga, iyo Hirgelinta Khidmadaha

---

Maaliyadda dugsiga waa kooban tahay, waxaana dhici karto in dugsiga u baahdo kaalmo taasoo dheeraad ku ah khidmadaha. Natiijo ahaan, dugsiga wuxuu weydiisan karaa in canshuurta laga dhimo deeqda saadka dugsiga, qalabka, ama lacagta, balse dugsiga kama dalban karo deeq.

Magaca ardayga waa qarsoodi mana loo kashifi karo qof aan jid u lahayn iyo baahi u qabin macluumaadka, iyadoo aan la fiirin haddii ardayga uu bixiyo khidmadda, deeqda, iyo wax ku biirinta ama haddii kale, ama uu dalbaday, qaatay, ama loo diiday ka-dhaafidda. Hase ahaatee, waxaa dhici karto in dugsiga uu ogolaasho ka haysto deeq bixiyaha, in uu aqoonsi ku habboon siiyo qof kasta ama urur kasta oo deeq badan ama wax ku dara dugsiga.

Dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga ma reeban karaan, ma yareyn karaan, ama ma xoojin karaan darajooyinka ama buundooyinka, ama ma ceshan karaan darajooyinka, jadwalada fasalka, buundooyinka, shahaadada, warbixinta, ama dibloomada si loo hirgeliyo bixinta khidmadaha.

---

Si aad u heshid macluumaad badan: La

xariir dugsiga:

Magaca: \_\_\_\_\_

Telefoonka: \_\_\_\_\_

Email: \_\_\_\_\_

Bogga Internetka: \_\_\_\_\_

La xariir Xariirka Khidmadaha Dugsiga dagmada (School Fees Contact):

Magaca: \_\_\_\_\_

Telefoonka: \_\_\_\_\_

Email: \_\_\_\_\_

Bogga internetka: \_\_\_\_\_

Tag bogga internetka dugsiga gobolka: <https://schools.utah.gov/schoolfees>